



Baarista iyo Qaadashada Daawada



XANUUNNADA LAWLAWYADA, TOURETTE SYNDROME, IYO LAWLAWGA

Lawlawgu waa dhaqdhaqaaq iyo codad aan qofku xakamayn karin, oo isdabo joog ah. Waa astaamaha ugu badan ee koox xanuunnada neefaraha ah oo ku dhaca carruurta loona yaqaano si wada jir ah Xanuunnada Lawlawga si gaar ahna loogu yeero *Tourette Syndrome (TS)*, *Xanuunka Joogtada ah (Dabo dheeraada)* ee *Lawlawga Dhaqaaqa iyo Codka*, iyo *Xanuunka Lawlawga Muddada Gaaban*.

Sadexdaan Xanuunnada Lawlawga waxaa magacooda lagu saleeyay noocyada lawlawga ay wataan (dhaqaaqa, codka/luuqda, ama labadaba) iyo xadka mudada lawlawyadu ay jiraan. Hoos waxaa ku qoran shuruudaha dhakhtarka ama xirfadlaha kale ee caafimaadku u adeegsan doono baarista TS iyo xanuunnada kale ee Lawlawga.¹ Ma jiro baaritaan lagu xaqiijinaayo helitaanka Xanuunnada Lawlawga, laakiin mararka qaar, baaritaannada ayaa muhiim u noqon kara si meesha looga saaro xanuunnada kale.

Tourette Syndrome (TS), oo sidoo kale loo yaqaano Xanuunka Tourette

- 1) Ugu yaraan 2 lawlawyada dhaqdhaqaaqa ah iyo ugu yaraan 1 lawlawga codka ah (luuqda) oo jiray, qasab maaha inay iskumar jiraan.
- 2) Lawlawyada ayaa imaan kara kaana tagi kara heerar kaladuwan laakiin wax ka badan 1 sano.
- 3) Lawlawyada ayaa imaan kara kahor da'da 18.
- 4) Lawlawyada ma keenaan adeegsiga wax ama xanuun kale oo caafimaad.

Xanuunka Lawlawga Joogtada ah (Dabo Dheeraaday) ee Dhaqdhaqaaqa ama Codka

Lawlawyada midflood dhaqaaqa ama Codka ee jiray wax ka badan 1 sano; qofku ma wada qabi karo labadaba khalkhalka hadalka iyo kan dhaqdhaqaaqa.

Xanuunka lawlawga ee Mudada Kooban

Lawlawyada dhaqaaqa iyo/ama codka ee jiray wax ka yar 1 sano, aanana buuxin shuruudaha TS ama Xanuunka Lawlawga Joogtada ah (Dabo Dheeraaday) ee Dhaqdhaqaaqa ama Codka.

¹ Shuruudaha waxaa cusboonaysiiyay American Psychiatric Association: Buugga Tasmada ee Baaritaanka iyo Tirakoobka Xanuunnada Dhimirka, Daabacaada 5aad. Arlington, VA., American Psychiatric Association, 2013.



NOOCYADA LAWLAWGA

NOOCYAD	FUDUD	BALAARAN
Lawlawga xubnaha jirka Tusaaleyaasha Qaar:	DHAQDHAQAAQA DEGDEGA AH, EE KOOBAN: Bigleeyta isha, madax ruxida, jacjuumida wajiga, garbo nuuxinta, calool kacsanaanta, ama jaglaynta gacanta	DHAQDHAQAAQA AYAA BADANAA TARTIIB AH WAXAYNA QAAB AHAAN U MUUQDAAN KUWO QOFKU U GASDAAYO: Taabashada, riixida, raqlaynta, lawyo liicinta, boodista, bood-boodka, <i>copropraxia</i> (ishaaroyin dhaajin ah).
Lawlawyada Codka (Luuqda) Tusaaleyaasha Qaar:	DHAWAAQYADA AMA QAYLADA LAMA FILAANKA AH: Neefsiga, qufaca, calyo tufida, ganuunaca, xanxantada dhuunta, xuurada, codadka xayawaanka, quuqlaynta, qaylinta	ERAYO AMA JUMLADO BADANAA KA BAXSAN MAWDUUCA: Oraahyo, erayo ama jumlado ("aamus", "jooji taas") * <i>coprolalia</i> (ku dhawaaqida erayo dhaajin ah), <i>palilalia</i> (ku celcelinta erayadiisa), <i>echolalia</i> (ku celcelinta hadallada dadka kale)

DULMARKA KOOBAN EE LAWLAWYADA

- Waxaa isbadela noocooda, darnaanta, ama meesha ay kaa qabtaan.
- Lawlawyada ayaa badanaa kordha marka aad qabto walaac, farxad, walwal, iyo daal.
- Qaarkood ayaa la xakamayn karaa, laakiin waa muddo kooban.
- Lawlawyada ayaa la yarayn karaa inta lagu jiro shaqooyinka diirada la saaraayo.
- Lawlawyada ayaa lagu fahmi karaa **damar horudhac ah**, oo lagu qeexo *dareenka dareemaha ama dhimirka oo imaanaaya kahor intaan lawlawgu imaan.*

BILOOWGA IYO MUDADA AY SOCDAANLAWLAWYADU

Lawlawyada ayaa badanaa soo baxa inta u dhaxaysa da'daha 5 sano iyo 7 sano, oo badanaa wata llawlawga dhaqaaqa oo kaa qabanaaya madaxa ama qoorta. Lawlawyada ayaa u muuqda inay yaraanayaan xadi ahaan iyo darnaantaba inta u dhaxaysa da'aha 8 sano iyo 12 sano waxayna u dhaxayn karaan kuwo fudud ilaa kuwo daran. Inta badan dadka qaba TS ayaa kasoo raysta xanuunka markay qaangaarnimada galaan, ayagoo qaarkood si buuxda uga bogsadaan. Tiro yar oo kamid ah dadka qaba TS ayaa sii lahaada lawlawyada joogtada ah, oo daran marka ay qaangaar noqdaan.

XANUUNNADA TS IYO LAWLAWGA AYAA AAD U BADAN

- Lawlawyada ku badan dugsiyada ayagoo ay qabaan **1** kamid ah **5** ilmood mararka qaar, laakiin maaha kuwo abadiyan ah.
- **Xanuunnada TS iyo Lawlawga oo la isku daray ayaa** lagu qiyaasaa inay ku dhacaan **wax ka badan 1 kamid ah 100 (1%)** carruurta da;da dugsiya gaaray ee ku nool Maraykanka.
- **TS** ayaa ku dhaca **1** kamid ah **160 (0.6%)** carruurta da'da dugsiya. Dadka lasoo sheego in laga helay wxanuunka Tourette ayaa ka yar tirada saxda ah, sababtoo ah in lawlawyada aan badanaa la aqoonsan. TS ayaa saamaynaysa dhammaan isirada, kooxaha bulshada, iyo da'aha, laakiin **3-4** jeer jibaar ayay ku badan tahay wiilasha marka loo eego hablaha.
- Ma jiraan qioyaasaadka la isku halayn karo ee guud ee xanuunnada TS ama Lawlawyada kale ee ay qabaan dadka waawayn. Hase yeeshee, waxaa la filayaa inay aad uga yar yihiin tirada carruurta qaba maadama lawlawgu uu yaraado marka qofku qaangaaro.

WAXYAABAHA KEENA TS

Waxyaabaha keena TS iyo Xanuunnada kale ee Lawlawga ayaan wali la aqoon. Xanuunadaan ayaa ku dhaca qoysaska, daraasaad badan ayaana xaqiijiyay in hide sidayaashu qayb ka yihiin. Xaaladaha bii'ada, kobaca, ama sababo kale ayaa qayb ka noqon kara xanuunadaan laakiin, waqti xaadirkaan, ma jiro curiye ama dhacdo gaar ah oo la aqoonsaday. Cilmi baareyaasha ayaa sii wada inay raadshaan hide sideyaasha iyo sababaha kale ee ka danbeeya Xanuunnada Lawlawga.

HELITAANKA XIRFADLE CAAFIMAAD OO YAQAANA XANUUNNADA TOURETTE IYO LAWLAWGA

Ururka Tourette Association of America (TAA) aaa leh liiska kugu xiraaya xirfadleyaasha caafimaadka iyo kuwa la xariira ee gobalku ku salaysan kuwaasoo khibrad u leh baarista iyo daawaynta Xanuunnada Lawlawga. Waxaa intaas dheer, Xarunta Barnaamijka Tourette Association Centers of Excellence (CofE) ayaa leh xarumaha caafimaadka ee heer sare ah oo ku yaala wadanka oo dhan kuwaasoo baxsha daryeel khibrad leh oo abaabulan. Fadlan ka fiiri qaybta *Support (Taageerada)* wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan Centers of Excellence. Waxaad sidoo kale kala xariiri kartaa Tourette Association barta **tourette.org** ama ka wac **888-4TOURET**.

***Keliya 1 kamid ah 10 qof oo qaba lawlawga ayaa qaba coprolalia. Jiritaanka coprolalia qasab uma ahan baaritaanka Xanuunka Tourette ama Lawlawyada kale.**

1 KAMID
AH
100

Ilmood oo kasta oo jira inta u dhaxaysa 5 sano ilaa 17 sano ayaa qaba Tourette ama xanuunka Lawlawga oo Kale.

U DIYAAR GAROOWGA BOOQASHADA DHAKHTARKAAGA

Kahor intaadan aadin booqashada dhakhtarka, soo aruurso xogta ku saabsan taariikhda hore, ayna ku jiraan baaritaannada, diiwaannada, iyo natiijoyinka baaritaanka. Waxaa sidoo kale muhiim ah inaad soo qaadata xasuus qorkaaga ama muuqaal aad iska duubtay ama ka duubtay lawlawyada cunugaaga si aad u tusto dhakhtarka haddii lacala aan lawlawyada la arkin intaad joogto balanta. Waa muhiim inaad dhakhtarka kala hadasho xalada cunugaaga iyo taariikhdaada buuxda ee caafimaadka, ayna ku jiraan xaaladaha caafimaadka, iyo daawoyin ama daawayno aad hadda iyo horay u qaadan jirtay.

XANUUNNADA BADANAA LA SOCDA LAWLAWGA

Dadka qaba TS ayaa badanaa qaba xanuunno kale oo dhanka dhimirka ah, ama xanuunnada kobaca oo jiray kahor intaan lawlawgu ku bilaaban. Inkastoo lawlawgu yahay cilada ugu wayn, xanuunadaan la socda ayaa keeni kara dhibaatooyin kale waxayna ka dhib badnaan karaan lawlawga qudhiisa.

Dadka qaba TS qaarkood, waxaa lagu qiyaasaa in 86% ay qabaan ugu yaraan hal xanuun kale oo dheeri ah. Inta badan xanuunnada la socda waxaa kamid ah kuwa soo socda:

- **Xanuunka Feejignaan La'aanta/Camal Xumada (ADHD):** Dhibaatooyin ka jira diirad wax saarida, camal xumada, iyo xanaaqa badan.
- **Xanuunka ama Dabeecadaha Ku Khafiifida Wax gaar ah (OCD/OCB):** Fikrado soo noqnoqday, oo qofku rabin oo carqalad dhilnaaya iyo/ama dabeecado soo noqnoqda. Fikradahaan ayaa keenaaya maskax wareer, oo ah dabeecado uusan qofku doonayn oo qofku dareemaayo inay qasab tahay inuu sameeyo marar badan ama qaab gaar ah.
- **Ciladaha Dabeecadaha am Anshaxa:** Carada, xanaaqa, caasinimada ama dabeecadaha dhaqan xumada ku ah habdhaqanka bulshada.
- **Walwalka:** Cabsi xad dhaafka ah ama baqdinta, ayna ku jirto xishoodka xad dhaafka ah.
- **Naafada Waxbarashada:** Dhibaatooyinka khrista, wax qorista, xisaabta, iyo/ama fahanka xogta oo aan la xariirin cilad dhanka garaadka ah.
- **Ciladaha Xirfadaha Bulshada iyo Shaqada Bulshada:** Xirfadaha dhibaataada hormarinta habdhaqanka bulshada; joogtayn xariirada bulshada ee uu la leeyahay ilmaha facis ah, xubnaha qoyska. iyo shaqsiyaadka kale; iyo inuu u dhaqmo qaab aan ku haboonayn habdhaqanka bulshada.
- **Ciladaha Fahanka Dareemaha:** Dookhyada iyo xasaasiyaadka dareemaha adag ee la xariira dareenka taabashada, codka, dhadhanka, urka, iyo dhaqdhaqaaqa oo carqalad ku ah qofka maalintii oo dhan.
- **Xanuunnada Hurdada:** Dhibaato ka haysata seexashada ama inuu sii hurdo.


DAAWAYNTA TS IYO XANUUNNADA KALE EE LAWLAWGA

Inta badan, lawlawyada ayaa ah kuwo fudud daawayn looma baahna. Hase yeeshee, haddii lawlawyada yihiin heer dhexe ilaa heer daran, daawayn toos ah ayaa loo baahan karaa. Haddii xanuunno waheliya ay jiraan, waxaa muhiim in adigga ama cunugaaga laga baaro lagana daweeyo xanuunnada kale marka hore ama hadhoow, maadaama ay ka naafo badan yihiin lawlawyada. Kiis kasta, waa muhiim in lagu baro marka aad tahay waalidka ilmaha ama qofka kale ee qaba Tourette. Sidoo kale aad ayay muhiim u tahay in la baro dadka kula jooga adiga ama cunugaaga (markuu qofku kuu ogolaado).

SHEEKO GAAR AH

Sam, oo jira 7 sano, ayaa samaynaayay dhawaaqyo iyo dhaqdhaqaaqyo muddo 3 sano ka badan kuwaasoo saamayn u lahaa qoyskiisa iyo noloshiisa dugsiga. Macalimiintiisa ayaa u qabay inay ciladahaan yihiin kuwo uu kas u samaynaayo. Dhakhtarkiisa carruurta, ayaa dhanka kale, soo jeediyay inay noqon karto cilad dhanka neerfaha wuxuuna Sam u gudbiyay Xarunta Tourette Center of Excellence. Sam waxaa laga helay xanuunka Tourette Syndrome iyo xanuunno kale (dhibaato ka haysata wax diirad saarida, dabeecada ku khafiifida wax gaar ah iyo xasaasiyaadka dareemaha) kuwaasoo lagu yaqaano TS ka. Ayagoo adeegsanaaya xogtaan, qorshaha daawaynta, iyo khayraadka laga heli karo webseedka Tourette Association, qoyskiisa ayaa fahan fiican ka haysta sida ay u caawin karaan Sam, dugsigiisa ayaana siinaaya taageerooyin ka caawinaaya yaraynta walwalka iyo astaamaha xanuunka. Sam iyo waalidkiis ayaa og inay u baahan yihiin inay dadka wacyi gashaan ayna sii wadaan inay u doodaan cunuga, laakiin hadda kadib ma dareemayaan inay keligood ku yihiin la noolaanshaha xanuunka TS.

TOURETTE SYNDROME Lawlawgu waa kan iceberg



KAHORTAGA U XOOG SHEEGASHADA

Nooca xanuunnada TS iyo inaan la fahmin inay yihiin habdhaqan aan la xakamayn karin ayna ka dhigaan carruurta TS qaba kuwo si gaar ah ugu nugul in lagu gardaroodo, taasoo u keenaysa kelinimo iyo walwal.

- Waa muhiim in la baro dhammaan xubnaha qoyska, macalimiinta, saaxiibada, iyo ilmaha faciska xanuunka TS. Xaqiiji inaad cunugaaga ka qaybgeliso doodaha. Waa muhiim in la adkeeyo in TS uu yahay xanuun caafimaad iyo in u sheegista cunugaaga inuu "joojiyo lawlawga" aysan ahayn farsamo wanaagsan (si lamid ah inaad qof ku tiraahdo, "Waxaad qabtaa indho buluug ah. Jooji lanaashaha indhaha buluuga ah.") waxayna u badan tahay inuu sababo niyad jab aad u badan.
- Ka fakar xaaladaha soo hagaajinaaya lawlawga ama ugasii daraaya. Waxaa jira xeelado cunugaagu u adeegsan karo inay ka caawiyaan maaraynta lawlawga xaaladaha kaladuwan. Xog dheeraad ah ayaa laga heli karaa qaybta *Education (Waxbarashada)* ee kiishadaan xogta.
- Xarumaha dugsiga, waxaa aad u haboon in la baro macalimiinta iyo ilmaha kale ayadoo lagusoo bandhigaayo fasalka iyo la wadaagista xogaha kale ee ku saabsan TS. Waxaad codsan kartaa ilaha Çxogta qaarkood adoo la xariiraaya Tourette Association ama booqanaaya tourette.org.



WALAACYADA IYO DABEECADAHA WAXBARASHADA EE KA JIRA DUGSIGA

- Ka codso falcelin toos ah macalimiinta cunugaaga oo ku aadan dedaalkiisa waxbarashada iyo dabecada fasalka.
- Iskuday inaad tijaabiso baaritaanka waxbarashada aadna qiimayso dhibaatooyinka waxbarashada iyo dareenka ee la socda xanuunka.
- Kala hadal dugsiga cunugaaga xogta ku saabsana Qorsheyaasha 504 ama Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah (IEP), kuwaasoo si wayn u kobcin kara dedaalka waxbarashada ee ardayda qaba lawlawga.

HELITAANKA DAAWADA LAWLAWGA

Marka lawlawgu dhibaato ku noqdo ama carqalad gasho nolol maalmeedka, baxnaaninta dabecada iyo/ama daawada ayaa laga fakari karaa. Maadaama qof kasta gaar yahay, waxaad u baahan tahay inaad la shaqayso dhakhtar tababaran kaasoo yaqaana TS iyo Xanuunnada Lawlawga si loo helo daawaynta ugu wanaagsan. Waxay qaadan kartaa waqti iyo dulqaad in la go'aansho qaabka ugu haboon. Waxaad sidoo kale akhriin kartaa Tilmaamaha Xeerka American Academy of Neurology si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan daawooyinka la heli karo.

CAAWIMAADA DHANKA DHIMIRKA EE BALAARAN EE XANUUNKA LAWLAWGA (CBIT)

Caawimaada Dhanka Dhimirka ee Balaaran ee Xanuunka Lawlawga (CBIT, oo loogu dhawaaqo "see-bit") waa daawaynta dabecada, oon ahayn daawo la cunaayo taasoo lagu ogaaday daraasaadka caafimaadka inay yarayso lawlawga carruurta iyo dadka waawayn. Daraasaadka ayaa sidoo kale muujiyay in CBIT uu wax u taraayo si lamid ah daawooyinka marar badan, waxaana badanaa lagu taliyaa in laga dhigo dookha koobaad ee daawaynta.

Waxaa jira 3 nooc oo muhiim ah oo kamid ah CBIT:

1. In wacyi fiican loo yeesho lawlawyada.
2. Abuurista jawaabo kahortag ah oo kahor imaanaaya lawlawyada iyo heer aan la ogaan karin inaad qabtaba.
3. Isbadello in lagu sameeyo shaqooyinka maalin kasta oo muhiim u ah yaraynta lawlawyada.

Baaritaan dheeraad ah ayaa loo baahan kara si loo ogaado xanuunnada la socda kuwaasoo caqabad ku noqon kara daawaynta CBIT, sida ADHD ga aan la daawayn ama Xanuunka Daran ee Caasinimada (ODD). In la go'aansho in baxnaaninada qaarkood ay ka fiican yihiin kuwa kale fikirka guud. Ma jiraa dhakhtarka CBIT oo tababaran oo deegaanka ka shaqeeya? Ma heli kartaa gaadiid? Caymiskaagu ma daboolayaa adeegyadaan? Keliya baxnaaniyaasha qaatay tababarka gaarka ah ee CBIT ayaa bixin kara daawayntaan. Ururka Tourette Association ayaa haya liiska xirfadleyaasha caafimaadka oo maray tababarka rasmiga ah ee barnaamijka daawaynta ee CBIT. Booqo tourette.org/find-a-doctor/.



DAAWOYINKA XANUUNKA LAWLAWGA IYO XANUUNNADA LA SOCDA

Haddii adigga ama cunugaagu qabo lawlawyada badan ama daran, ama lawlawyada ku keenaaya waxyeelaynta naftiisa, dhakhtarkaaga ayaa ku talin kara daawooyin. Inkastoo daawadu ku caawin karto, ma daawaynayso lawllawga. Lawlawyada ayaa wali imaan kara oo bixi kara xawaare iyo darnaan kaladuwan, isbadello ayaana ku imaan kara.

Haloperidol (Haldol), pimozide (Orap), iyo aripiprazole (Abilify) waa daawooyinka keliya ee hadda ay ogol yihiin U.S. Food and Drug Administration (FDA) in lagu daaweeyo lawlawga. Dhakhaatiirta ayaa badanaa ku bilaaba daawooyin "dabiici ah" (aan ahayn daawooyinka siga gaarka ah ay FDA u ogolaatay in lagu daaweeyo lawlawga) kuwaasoo waxtar u yeesha hoos u dhigista lawlawga lehna cilado ka yar kuwa ay keenaan daawooyinka kale.

Daawaynta xanuunnada la socda, sida ADHD iyo OCD, ayaa badanaa u baahan in daawo la siiyo, taasoo kor u qaadaysa tayada noloshu bukaannada qaba TS waxayna kaa caawin karaan hoos u dhigista lawlawga. Hanaanka maaraynta dabeecadaha ayaa sidoo kale lagu daawayn karaa xanuunadaan. Daawooyinka maskaxda dejiya iyo/ama baxnaaninta habdhaqanka ayaa waxtar u leh carruurta qaba TS iyo ADHD. Daawooyinka caadiga ah ayaa sidoo kale waxtar u yeelan kara. Daawooyinka Dhimirka ee Gaarka ah ee serotonin reuptake (SSRIs) iyo baxnaaninta dhimirka ee garaadka, ayna ku jirto kahortaga u banbixida iyo jawaab celinta, ayaa waxtar u leh dhalinta iyo dadka waawayn ee qaba walwalka/OCD caadiyana waa daawayn loo dulqaadan karo. Xaqiiji inaad ka codsato dhakhtarkaaga faa'iidooyinka iyo khataraha isticmaalka mid kasta oo daawooyinkan kamid ah.



ADEEGYADA BAXNAANINTA IYO KAALMAATIGA AH

Adeegyada Baxnaaninta Shaqada (OT), Baxnaaninta Jirka (PT), iyo Baxnaanint Hadalka Luuqada (SLP) ayaa badanaa

loo adeegsadaa in lagu daaweeyo xanuunnada la socda cudurka waxaana badanaa laga heli karaa xataa baadiyaha.

- **Baxnaaninta Shaqada (OT):** Baxnaanin u sahlaysa qofka inuu ka qaybgalo doorarka, hawlaha joogtada ah, iyo jadwallada guriga, dugsiga, shaqada, bulshada, iyo goobaha kale.
- **Baxnaaninka Jirka (PT):** Baxnaanin lagusoo celinaayo, lagu joogtaynaayo, korna loogu qaadaayo shaqada jirka.
- **Baxnaaninta Hadalka ama Luuqada (SLP):** Daawaynta xanuunnada hadalka, luuqada, bulshada, xariirka, garaadka hadalka, iyo xanuunnada wax liqida.

Haddii adiga ama cunugaagu dhib ku qabo lawlawyada meelaha kore, helitaanka adeegyada baxnaaninta ayaa caawinaaya. **Ka fakar su'aalaha soo socda si aad u waydiiso xarunta baxnaaninta marka aad raadinayso xarun aad ka hesho adeegyada:**

- Xaruntiinu ma bixisaa adeegyada kaladuwan ee OT, PT iyo SLP?
- Miyaad leedahay tababar ama shahaado taqasus oo la xariira mawduucyada kore?
- Miyaad qabtaa wax tababar taqasus oo la xariira daawaynta bukaannada qaba Tourette Syndrome (ama wax kamid ah xanuunnada soo socda oo aad xalinayso)?



	OT	PT	SLP
Shaqada Fulinta	●		●
Isku dhafka Dareemaha	●		
Tababarka Feejignaanta	●		●
Xakameynta Xanuunka		●	
Xirfadaha Bulshanimada iyo Cabirada	●		●
Hawlaha Nolol Maalmeedka	●		
Gacan wax ku qorista	●		
Nadaafada Hurdada	●		
Qalabka Kaalmaatiga ah	●		
Gaagaalaynta Hadalka			●
Ciladaha Caafimaadka Gaarka danbe		●	
Kala daadsanaanta	●	●	
Dhaqdhaqaaqa lafaha	●		
Dhaqdhaqaaqa guud		●	
Fahanka Akhriska			●
Cilada wax xifdinta (Dyslexia)			●
Xirfadaha Shaqada	●		●
Neerfaha Isha ama Araga	●		
Cunto Diidista	●		●
U diyaar Garoowga Gaari Wadista	●		
Xakamaynta Kacsiga iyo Carada	●		●

SU'AALAHA BADANAA LA ISWAYDIYO

Waxyaabaha soo socda ayaa ah qaar kamid ah su'aalaha Inta badan la iswaydiiyo ee ka yimaada dadka raadinaaya xarumaha caafimaadka ee Tourette. Jawaabaha waxaa baxsha xubnaha Gudiga Talo Bixinta Caafimaadka ee Tourette Association.

CUNUGAYGU MA KA KORI DOONAA LAWLAWGA?

Qaar badan oo kamid ah carruurta da'da dugsiga ayaa qaba lawlaw mar uun kamid ah noloshooda, ayadoo ku dhawaad 1 kamid ah 10 ilmood ba uu qabo lawlawga socda wax ka badan hal sano. Ma jiro qaab lagu qiyaasi karo xiliga ama meesha lawlawgu kaaga haraayo. Marka lawlawgu jiro muddo dheer, waxay u badan tahay inay raacaan qaab la qiyaasi karo. Ilmaha ayaa bilaaba inay yeeshaan lawlawga inta u dhexaysa da'aha 5 iyo 7, lawlawga ayaa aad u kora dhanka xawaaraha iyo darnaanta inta u dhexaysa da'aha 8 iyo 12 sano, soona bogsooda laga bilaabo kuraynimada ilaa biloowga da'da 20aadka.

CUNUGAYGU MA QAADI DOONAA XANUUNKA COPROLALIA AMA COPROPRAXIA? CUNUGAYGA AYAA MARARKA QAAR DHAARTA, LAAKIIN MA HUBO INUU QABO LAWLAW IYO INKALE.

Inkastoo uu walaac ku hayo bukaannada iyo qoysaska, coprolalia (hadalka aal la xamayn karin ee cayda ah ama erayada habdhaqanka bulshada kasoo horjeeda) iyo copropraxia (ficalada cayda ah ama ishaarooyinka xun) ayaa keliya ku dhaca tiro yar oo kamid ah dadka qaba TS. Ma jiro qaab lagu qiyaasi karo in qof uu qabi doono lawlawyada noocan ah. DAdka badanaa hela qaab ay ku qariyaan, tusaale, ku qarinta erayga neefsigooda ama ku dhafaaya ishaarada wajiga ee dhaqan xumada ah ishaaro kale, oo habdhaqan ahaan fiican. Sidoo kale waa muhiim in la kala saaro dhaarta loo qasday, taasoo ku timaada sida qofku dareemaayo iyo waxa socda, iyo codka lawlawga ah ee uusan qofku xakamayn karin. Inkastoo ay tahay wax aan la xakamayn karin, qaar kamid ah lawlawga ayaa loo arki karaa dhaqan xumo ama calaamada inaan ilmuhu helin waalidnimo sax ah. Carruurta qaba lawlawga waa inay kala shaqeeyaan xirfadle caafimaad ama xirfadle waxbarasho si loo go'aansho qaabab wanaagsan, ee kahortaga ah ee loo maarayn karo lawlawyadaas isku dhafan.

SANADKII LASOO DHAAFAY, CUNUGAYGA AYAA BILAABAY INUU INDHAHA KA BILIG SIIYO SI JOOGTO AH. HADDANA WUXUU KA XANXANTOONAYAA DHUUNTA MARKASTA. MA TAHAY INAAN KA WALAACNO INUU KASII DARI DOONO?

Inkastoo lawlaw gaar ah uu u muuqan karo mid joogto ah markasta oo uu dhaco, lawlawga qofka ayaa is badeli kara—oona isbadella—muddo kadib. Lawlawyada ayaa sidoo kale kaladuwan bad ahaan iyo darnaan ahaanba maalinba maalinta ka danbaysa iyo asbuuc ba asbuuca ka danbeeya.

WAXAAN OGAADAY IN LAWLAWGA CUNUGAYGU KORDHO MARKA UU DHEELAAYO CIYAARTIISA MUUQAALKA AH. UMA MUUQDO INUU OGAANAAYO LAWLAWGA INTUU CIYAARAAYO, LAAKIIN MA TAHAY INAAN KA MANUUCNO DHEELISTA?


Lawlawyada ayaa kordha marka walaac jiro—istareeska fiican (tusaale, farxada, hamiga), istareeska xun (tusaale, walwalka, walaaca), iyo istareeska jirka (tusaale, daalka, xanuunka). Maadaama cunugaaga aysan dhib ku hayn lawlawgiisu markuu dheelaayo, looma baahna in la yareeyo waqtigiisa dheelista gaymka muuqaalka ah ayadoo lagu salaynaayo lawlawga; hase yeeshee, ayaa ku talinayaa yaraynta waqtiga ilmuhu isticmaalaayo shaashada lagana dhigo 2 saacadood maalintii carruurta iyo kurayda maadaama sidaas tahay nolosha caafimaadka leh.

CUNUGAYGA AYAA ISKUGU ARUURSHA DHAMMAAN BOONBALEYAASHIISA QAAB AAD GAAR U AH, SI XAD DHAAF AH AYUU U DHAQAA GACMIHIISA, WAANA INUU TIRO XARFIHIISA MARAR BADAN ILAA AY U "MUUQDAAN KUWO SAX AH." DABEECADAHAAN MA LAWLAW BAA?

Dabecadahaan waxaa lagu yaqaanaa habdhaqanka ku khafiifida wax gaar ah, laakiin carruurta qaba labada xanuunba way lahaan karaan dabecadaha noocan ah. Xanuunnada Lawlawga ayaa muujinaaya astaamo badan oo ay la wadaagaan xanuunno kale oo kuwa kobaca neerfaha ah, ayna ku jiraan ADHD, xanuunnada walwalka, xanuunka ku khafiifida wax gaar ah, dysgraphia/naafada dhaqdhaqaaqa jirka, dhibaatooyinka waxbarashada, iyo xanuunnada xakamayn la'aanta dabecada.



Cutubyada, kooxaha taageerada, iyo aqoon korosiyada qoyska ayaa siinaaya tusmo, farsamooyin iyo khayraad kumanaan dad ah wadanka oo dhan.



CUNUGAYGA AYAA QABA KHALKHALKA HADALKA OO AAD U DHIB BADAN MARKUU JOOGO FASALKA EE LAGU JIRO IMTAXAANKA. DUGSIGA AYAA KU TALINAYAA IN CUNUGEENA LOO SAMEEYO ADEEGGA GURIGA SABABO CAAFIMAAD AWGOOD. MAXAY TAHAY INAAN SAMAYNO?

Sida ku cad sharciga Individuals with Disabilities Education Act (IDEA, SHarciga Waxbarashada Dadka Naafada ah), Dhammaan carruurta ayaa xaq u leh waxbarasho bilaash ah oo ku haboon laguna siiyo goob aan lahayn xadidaad ilaa inta macquulka ah. Haddii lawlawga ilmuhu ay carqalad ku abuurayaan markuu fasalka joogo, markaas talaabada ugu haboon ayaa noqonaysa in dugsigu u sameeyo qorshaha 504 ama Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah - IEP). Mararka badan, caawimaadaha fudud, sida in ilmaha loo ogolaado inuu imtixaankiisa ku galo goob gaar ah, ayaa keliya loo baahan yahay si ilmuhu guul uga gaaro goobta dugsiga.



CUNUGAYGA AYAA DHAWAAN BILAABAY DAAWOYINKIISA LAWLAWGA. LAWLAWGIISA AYAA HOOS U DHACA XADI AHAAN LAAKIIN MA WADA JOOGSAN. MA TAHAY INAAN ISKU DAYNO DAAWO KALE?

Inkastoo ay jiraan tiro daawooyin waxtar leh oo loo sameeyay lawlawga ayna ku jirto daawada la cuno, daawooyinka hadda jira ma "daaweeyaan" lawlawga. Yoolka daawaynta lawlawgu waa in la yareeyo lawlawga ilaa heer aysan xanuun abuurayn iyo/ama aysan caqabad ku ahayn tayada nolosha ilmaha.



CUNUGAYGU WUXUU QABAA ADHD, LAWLAWGIISUNA WUXUU BILOOWDAY MUUDO YAR KADIB MARKUU QAATAY DAAWO MASKAX DEJIN AH. WAXAAN ISKUDAYNAY INAAN JOOJINO DAAWADA DEJINTA AH, LAAKIIN LAWLAWGA AYAA WALI SII SOCDAY. MA DAAWADA AYAA KEENTAY LAWLAWGIISA?

Carruur badan oo qaba TS ayaa qaba ADHD, marka su'aashaan waa mid aad la isku waydiyo. Waxaa jirta cadayn wayn oo muujinaysa in daawada niyad dejinta ah ay tahay daawayn badqab iyo waxtar u leh daawaynta ADHD ga carruurta qaba Lawlawga. Daawada niyad dejinta ah ma keento lawlaw, mana keenaanaan in lawlawgu kasii daro. Joojinta ama wax ka badalka daawada dejinta ah ee cunugaaga ayaan keenayn in lawlawgu muddo badan kasoo raayo.

MA JIRAAN DAAWAYN CUNTO AMA DABIICI AH OO LAGU DAAWAYN KARO LAWLAWGA?


Waqti xaadirkaan, ma jirto cadayn saynis oo taageeraysa adeegsiga cuntooyinka baabi'inta cilada, cuntooyin gaar ah, ama kaalmaati cunto si loo daaweeyo xanuunka Lawlawga.

LAWLAWGA CUNUGAYGA AYAA U KEENAAYA INUU SHAQADA DUGSIGA KA MASHQUULO. MAXAY TAHAY INAAN SAMAYNO?

Inta badan, ka mashquulida shaqada dugsiga waxaa keenaaya xanuunka ADHD halkii ay lawlawyadu keeni lahaayeen. Dad badan oo qaba TS ayaa sidoo kale qaba ADHD kuwaasoo carqalad ku ah waxbarashadiisa iyo dhigashada ama ku dedaalida shaqooyinka dugsiga. Ka baar cunugaaga inuu qabo ADHD haddii laga helana, sii daawada ADHD. Waxaad sidoo kale dooni kartaa in laga baaro dhibaatooyinka waxbarashada iyo ciladaha kale ee waxbarashada. Caawimaadaha gaarka ah ee fasalka ayaa caawin kara.

TILMAAN CAAWIMAAD BADAN

Waxaa haboon inaad samayso liiska 3-5 su'aalood ee ugu sareeya ee aad u baahan tahay in lagaaga jawaabo marka aad joogto booqashada dhakhtarka. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad diirada saarto booqashada, gaar ahaanna marka waqtigu aad u yar yahay.



Xaqiijin

TAA waxay qiraysaa doorka shaqsiyaadka soo socda ka qaateen abuurista buugaan xogta:

Michael B. Himle, PhD

University of Utah

Joseph Jankovic, MD

Baylor College of Medicine

Rebecca K. Lehman, MD

Palmetto Health - USC

Jonathan W. Mink, MD, PhD

University of Rochester

Heather Simpson, MOT, OTR/L

Xarunta Caafimaadka ee UF ee Xanuunnada Dhaqdhaqaaqa iyo Daawaynta Neerfaha



tourette.org 888-4TOURET